



Diyaar ma u tahay inaad bilowdo dugsiga hoose?

Hadda maadaama uu ilmahaagu 5 jirsanayo, waa waqtigii aad ka fikiri lahayd inaad ka diiwaangeliso dugsiga hoose.

Sannadka ugu horreeya ee dugsiga hoose waxaa loo yaqaanaa Aasaaska (Prep). Carruurtu waxay bilaabi karaan Aasaaska (Foundation) haddii ay 5 sano gaaraan marka la gaaro 30-ka bisha Abriil sannadka ay dugsiga bilaabaya.

Waa khasab in carruurta da'doodu tahay 6 sano la geeyo dugsi/iskuul.

Sida looga diiwaangeliyo dugsiga hoose ee dawladda Victoria

Intaadan diiwaangelinta bilaabinka hor

- Go'aami sannadka uu ilmahaagu bilaabi karo dugsiga iyadoo lagu saleynayo da'diisa
- Ka hel dugsiyada xaafadaada ku yaal **findmyschool.vic.gov.au**
- La xiriir dugsiyada hoose laga bilaabo Teeramka 1-aad si aad u ballansato booqasho (wax qasab ah maaha).

Sida loo codsado

- Codsiyada Foundation (Prep) waxay furan yihiin laga bilaabo bilowga Teeramka 2-aad
- Soo gudbi foomka codsigaaga Jimcaha ugu dambeeya ee bisha Luulyo
- Dugsiga ayaa kula soo xiriiri doona iyagoona kuu soo sheegi doona natiijada 2-da isbuuc ee ugu horeysa ee bisha Agoosto.



Xog badan ka hel
vic.gov.au/enrolling-foundation-prep